

Tilmaamaha Codsiga ee Liiska Sugitaanka

Home Forward waxay qaadanaysaa labo ah liisaska sugitaanka ee taageerada dhanka ijaarka laga bilaabo **Talaadada, Abriil 15 waqtiga 9:00 subaxnimo** ilaa **Isniinta, Abriil 21 waqtiga 11:59 habeenimo**.

Liisaskani sugitaanka waxaa loogu talagalay:

1. Barnaamijka **Foojarka Kala doorashada Guryaha (HCV)**.
2. **13 ah bulshooyinka abaarmanada ee Home Forward** (liisaska sugitaanka hantida ku saleysan).

Barnaamijyadani waxay kaa caawiyaan in aad awoodo ijaarka, laakiin ma jiraan ilo ku filan qof walba. Taasi waa sababta ay u jiraan liisaska sugitaanku. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan kuwo ay yihiin hantida guryaha ee furmi doonta, booqo homeforward.org/waitlists.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad inta lagu jiro furitaanka liiska sugitaanka, waxaad sidoo kale Khadka Taageerada Codsadaha ka wici kartaa 503-415-8050. **Ogow: Wuxuu furmi doonaa Abriil 15, 16, 17, 18 iyo 21 oo kaliya, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo.**

Waxa Aad U Baahan Tahay in Aad Ogaato

Ka hor inta aadan codsan, akhriso macluumaadkani muhiimka ah:

- ✓ Liiska sugitaanku wuxuu furmaa iyada oo la isticmaalayo nidaamka bakhtiyaanasiiibka, markaa muhiim ma aha in aad codsato maalinta u horreysa ama u dambeysa; waxaad heli doontaa fursad isku mid ah oo liiska lagu gelayo. Si kastaba ha ahaatee, **waa IN AAD codsato ka hor 11:59 habeenimo Isniinta, Abriil 21. Intaasi ka dib, waa in aad sugtaa ilaa inta uu ka furmayo liiska sugitaanka ee xiga. Ha sugin ilaa inta laga gaarayo daqiiqada u dambeysa!**
- ✓ **Codsiyada waxaa laga helayaa dhanka internet-ka.** Waxaad codsan kartaa in ka badan hal liiska sugitaanka ah. Codsiga waxaa la helayaa isaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Soomaali, Af-Ruushka, iyo Vietnamese.

- ✓ Waxaad koontadaada sameysan kartaa ka hor Abriil 15. Haddii aad horeba u lahayd koonto, waxaad u baahan kartaa in aad dib u dejiso password-kaaga. Meesha laga sii gelayo 'link' si la isku diiwaan geliyo waxaa laga heli doonaa homeforward.org/waitlists.
- ✓ Haddii aad leedahay koonto, waxaad kaliya u baahan tahay in aad isticmaasho email-ka iyo password-ka aad isku diiwaan gelisay. Haddii aadan xasuusnayn password-ka aad isticmaashay, kaliya riix "forgot password" waxaana meel laga sii galeyo dib u dejinta 'reset' lagu soo diri doonaa cinwaanka email-ka ee aad u isticmaashay diiwaan gelinta.
- ✓ Qof kasta oo codsada ma geli doono liiska sugitaanka. Bakhtiyaanasiib ayaa si nasiib ah looga soo xulan doontaa dadka ku jiri doona liiska.
- ✓ In aad ku jirto liiska sugitaanku kama dhigna in aad isla markiiba heli doonto caawimaad. Waa in aad weli u qalantaa marka magacaaga la doorto.
- ✓ Waqtiyada la sugayaa way kala duwan yihiin barnaamij kasta. Boosaska liiska sugitaanka ee HVC waxay furmaan marka muddo la joogaba. Liisaska sugitaanka hantida ku saleysan waxay furmaan marka guryaha la heli karo.
- ✓ Home Forward ayaa kuu sheegi doonta haddii lagu doorto. Waxaad farriin ku heli doontaa email ahaan, telefoon ahaan, ama boosta ahaan muddo aan ka dambeyn Sibtambar 1, 2025.

Ma U Qalmaa?

Qof kasta ayaa codsan kara liiska sugitaanka, laakiin **waa in aad u qalantaa** HCV ama taageerada dhanka ijaarka ee hantida ku saleysan marka magacaaga la soo xusho, ama boos banaan uu furmo. Home Forward ayaa dib kuu eegi doonta u qalmidaada waqtigaasi. Haddii aad u maleynayso in aad u qalanto, hore u soco oo codso!

Si aad ugu qalanto barnaamijyada:

- ✓ Qoyskaaga waa in uu sameeyaa wax kar yar boqolkiiba 50% oo ah Heerka Dakhliga Dhexdhexaadka (AMI).
- ✓ Mas'uulka guriga waa in ay ugu yaraan da'diisu tahay 18 jir ama qof dhallinyaro ah oo si sharci ah xor u noqday.
- ✓ Ugu yaraan hal qof oo guriga ka tirsan waa in uu yahay muwaadin Maraykan ah ama leeyahay xaalad deganaansho oo loo qalmo.
- ✓ Qof kastaa waa in uu oggolaadaa baaritaanka taariikh dambiyeedka.

Xaddadka u yaala Dakhliga (Dakhliga Ugu badan ee Sanadkii & Bishii)

Tirada Qoyska	Dakhliga Ugu badan ee Sanadkii	Dakhliga Ugu badan ee Bishii
1	\$41,300	\$3,441
2	\$47,200	\$3,933
3	\$53,100	\$4,425
4	\$59,000	\$4,916
5	\$63,750	\$5,312
6	\$68,450	\$5,704
7	\$73,200	\$6,100
8	\$77,900	\$6,491

Ogow: Xaddadka u yaala dakhligu waa kuwo isbeddeli kara dhawaan.

Waxa Aad u Baahan tahay in aad Codsato (Liiska hubinta)

Ka hor inta aadan codsan, diyaari macluumaadkan:

- Magacyada qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan.
- Taariikhaha dhalasho ee qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan.
- Inta ay le'eg tahay lacagta uu qof kastaa sameeyo iyo halka ay ka timaado.
- Lambarka Social Security-ga (SSN) ama ITIN ee qof walba (haddii aadan lahayn mid, geli 999-99-9999)
- Cinwaanka boosta halka aad ku heli karto boostada muhiimka ah, sida:
 - Cinwaanka xubin ka tirsan qoyska ama saaxiib
 - Adeega boostada
 - Sanduuqa Boosta P.O. Box lacag la'aan ah (booqo [website-kan](#))
 - Transition Projects Mail Pick-Up at Bud Clark Commons, 650 NW Irving St, Portland, OR 97209
- Cinwaanka email-ka. Haddii aadan lahayn cinwaanka email-ka, waxaad sameyn kartaa cinwaanka email-ka adiga oo riixaya [halkani](#).
- Lambar telefoon oo aad ka heli karto farriimaha.

Talooyin Muhiim ah

- ❑ Waa in aad xusuusataa email-kaaga iyo password-kaaga. Home Forward dib kuuguma dejin karto 'reset' adiga.
- ❑ Password-ku waa in uu leeyahay:
 - Ugu yaraan yahay 10 xaraf/kalmadood/astaamood 'characters'
 - Hal xaraf oo weyn (A-Z)
 - Hal lambar (0-9)
 - Hal astaan/calaamad (@, \$, iwm.)
- ❑ Password-kaaga ku qoro meel ammaan ah!
- ❑ Ma u baahan tahay caawimaad? Khadka Taageerada Codsadaha ka wac 503-415-8050 (wuxuu furan yahay Isniinta-Jimcaha, 9 subaxnimo-5 galabnimo laga bilaabo Abriil 15-21).

Gudbinta Codsigaaga

Laga bilaabo Abriil 15, waxaad codsigaaga ka gudbin doontaa dhanka internet-ka ee homeforward.org/waitlists. Taasi waxay ku geyn doontaa nidaamka codsiga dhanka internet-ka ee (Rent Café). Tilmaamaha ku saabsan sida loo sameysto koonto ka hor inta aysan furin liisaska sugitaanka iyo sidoo kale sida loo buuxiyo ee loo gudbiyo waxaa laga heli karaa homeforward.org/waitlists.

Ilo dheeraad ah ayaa la helayaa si ay kuu taageeraan:

- ❑ **Khadka Taageerada:** Khadka Taageerada Codsadaha waxaa la helayaa inta lagu jiro muddada codsiga. Waxaa dhici karta in aad hesho taageero adiga oo naga soo wacaya 503-415-8050 Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo maalinta Talaadada, Abriil 15 ilaa Isniinta, Abriil 21, 2025.
- ❑ **Taageerada Shakhsi ahaaneed:** Maktabadaha degaanka ayaa ah meelo fiican oo laga helo gelitaanka internet-ka, laga barto sameynta email-ka, ama laga helo gelitaanka kambiyuutarka. Dadka bulshada u adeega ayaa sidoo kale la helayaa si ay u bixiyaan taageero fool ka fool ah 1:1. Booqo homeforward.org/waitlists si aad u hesho macluumaad cusub oo ku saabsan caawimaada la heli karo waqtigaasi.
- ❑ **Ilaha La isku adeegayo:** Jawaabaha la xiriira su'aalaha inta badan la isweydiiyo iyo casharrada wax helitaanka iyo Tilmaamaha

Codsiga ka akhriso homeforward.org/waitlists

Ma leedahay helitaan kooban oo la xiriira tiknoolajiyada? Wac khadka tooska ah si aad codsigaaga telefoon ahaan ugu gudbiso xubin shaqaale ah oo ka tirsan Home Forward.

Ku buuxinta dhanka telefoonku waxay xaqiijinaysaa in aad buuxin karto wakhtiga kama dambeysta ah ee loo qabtay codsiga. Adeegyada turjumaada ayaa la helayaa.

Ma u baahan tahay codsi warqad ah? Home Forward way aqbali doontaa codsiyada warqada ah xaaladaha qaarkood marka la codsado oo kaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxaanu *si adag kuugu dhiirigelinaynaa* in aad codsigaaga ku soo gudbiso dhanka internet-ka. Waxaad sidoo kale wici kartaa Khadka taageerada oo codsigaaga ku gudbin kartaa telefoon ahaan, gaar ahaan haddii aad naafo tahay, u baahan tahay turjumaad ama u baahan tahay qorshe macquul ah.

Haddii aad u baahan tahay codsi warqad ah, fadlan email u soo dir WaitlistPortalHelp@homeforward.org ama **wac 503-415-8050 muddo aan ka dambeyn Jimcaha, Abriil 12, waqtiga 12:00 duhurnimo**. Jimcaha si aad u codsato in codsi warqad ah boosta laguugu soo diro. Codsiyada warqada ah waa in lagu soo gudbiyaa boosta Maraykanka WAANA in ay ku taalaa shaabad taariikhdeedu tahay ama ka horayso Abriil 21, 2025, si loogu qalmo. Codsigaaga boosta ugu soo dir Home Forward, 135 SW Ash Street, Portland, OR, 97204. Attention: Waitlist Opening.

Codsiyada warqada ah ayaa la heli doonaa iyaga oo ku qoran Ingiriisi, Af-Ruushka, Isbaanish, Soomaali iyo Vietnamese.